

Caafimaadka shucuurtu waa qayb muhiim ah oo kamin ah caafimaadkeena guud wuxuuna muhiim u yahay marxalad kasta oo nolosha ah — laga soo bilaabo carruurnimada iyo qaangaarka ilaa qof weynnimada. Waxay saameysaa sida aan u fikirno, dareeno, u dhaqano iyo sida aan ugu falcelino cadaadiska.

Walaaca caafimaadka maskaxda inta lagu guda jiro carruurnimadu wuxuu saameeyaa 1 kamin ah 5-tii carruur ah waxaana caadi ahaan kamin ah cudurka kacsanaanta feejignaan la'aanta (ADHD), walwalka iyo nidaam darada dabeeecada. Waxay ka dhigi kartaa mid adag si canuga wax u barto, u dhaqmo oona shaqeeyo maalintii oo dhan.



## Khayraadka Bulshada

### 211 United Way

211unitedway.org  
541-291-0211 or 211  
Qoraalka koodhka boostada 898-211

### Dakota County Crisis Response Unit

952-891-7171

### National Suicide Prevention Lifeline

800-273-8255

### Crisis Text Line

Qoraal MN ku socoto 741741

### The Trevor Project (LGBTQ Youth Crisis Line)

866-488-7386  
Qoraal 'start' ku socoto 678-678

### Disability HUB MN

disabilityhubmn.org  
866-333-2466

## Adeegyada Maareynta Kiiska Caafimaadka maskaxda ee Carruurta

Adeegyada Carruurta iyo  
Qoyska ee Degmada Dakota



### Children and Family Services

14955 Galaxie Ave.  
Apple Valley, MN 55124  
Khadka ugu weyn: 952-891-7400  
Khadka qaadashada: 952-891-7459  
[www.dakotacounty.us](http://www.dakotacounty.us),  
raadi Children's Mental Health



Please recycle.



Dakotacountygovernment

2021

Halkan si ay kuu caawiyaan.





# Ogow calaamadaha digniinta

- Xanaaq, dabeeecada seeflaboodka.
- Burburka hantida.
- Foojignaanta oo ku adag.
- Dareemada walwalka ama isbedellada muhiimka ah ee xaalada niyadda.
- Dareemaha joogtada ah ee niyad-jabka, farxad-la'aanta ama raja-dhigida.
- Xilliyada joogtada ah ee jahwareerka ama illowshaha.
- Awoodid la'aanta in aad saaxiibo la noqoto carruurta kale.
- Xiiseyn la'aanta ku aadan qoyska, asxaabta ama hawlahaa ay jecelyihiin.

## Adeegyada Maareynta Kiiska ee Caafimaadka Maskaxda Carruurta (CMH)

Carruurta qaarkood ayaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan taageero soconaayo oo ka yimaadda shaqaalaha bulshada ee maamulka kiiska caafimaadka maskaxda. Adeegyada maareynta kiiska waxay bixiyaan hagitaan iyo iskuduwid si ay u caawiyaan carruurta kuwaas oo qaba welwelka caafimaadka maskaxda inay

helaan taageerada iyo daaweynta ay u baahanyihiin.

Kuwa u qalma, maareynta kiiska waxaa lagu bixiyaa si lacag la'aan ah. Adeegyada kale ee lagu taliyay sida daaweynta shakhsiga iyo qoyska iyo maareynta caafimaadka waxaa guud ahaan daboola caymiska caafimaadka.

### Sida ay u shaqeyso:

#### ❶ Kala xiriir Qaadashada Adeegyada Carruurta iyo Qoyska 952-891-7459

Gudbinta waxaa sameeya waalidka/mas'uulka ama xirfadlaha caafimaadka maskaxda kaas oo hadda canuga ugu adeegaya goob isbitaal ah ama xarun deegaan oo lagu daweeyo. Gudbinta ka timaada xirfadlaha caafimaadka maskaxda waa inay ku jirtaa macluumaadka sii-deynta, macluumaadka xiriirkaa ee ku aadan qoyska iyo qiimeynta ogaanshaha. Sababtoo ah adeegyada waa ikhtiyaar, oggolaansho qoraal ah ayaa loo baahanyahay.

#### ❷ Qiimeynta caafimaadka maskaxda ee carruurta

- Maareeyaha kiiska ayaa kaa caawin doona aqoonashada baahiyaha degdega ah iyo isku-duwidda adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay canuga iyo qoyska. Waxay go'aamin doonaan haddii canugaaga laga helo shuruudaha loogu talagalay adeegyada soconaayo ee maareynta kiiska. Waxay qaadan kartaa ilaa 90 maalmood si loo go'aamiyo u qalmitaanka.



- Carruurtu waa inay u dhexeeyaan da'da 3-17 oo ayna deganaadaan Degmada Dakota.
- Waa inuu lahaadaa ogaanshaha caafimaadka maskaxda ee u qalma iyo naafonimo shaqo oo ahmiyad leh taas oo saamayeysa nolol maalmeedkooda.

#### ❸ Adeegyada maareynta Kiiska CMH ee soconaaya

- Haddii canugaaga uu u qalmo, maareeyaha kiiska CMH ee soconaaya ayaa soo saaraaya qorsha wax ka qabanaya baahida canuga iyo qoyska, wuxuuna kormeerayaa adeegyada lagu taliyey. Dhammaan adeegyada waxaa lagu heshiiyey iyadoo lala kaashanaayo qoyska.
- Maareeyayaasha kiiska waxay ula kulmaayaan canuga iyo waalidka/mas'uulka si billa ah (ugu yaraan) guriga canuga, dugsiga ama goobta bulshada taas oo si fiican ugu shaqeeyesa qoyska.